



**SOMALI NATIONAL  
BUREAU OF STATISTICS**  
Federal Republic of Somalia

# TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA FEBRAAYO 2023



## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Febraayo 2023 ayaa gaaray 134.54, marka la barbardhigo 133.99 bishii Janaayo 2022.

Isbedel bileedka, Febraayo 2023, marka la barbar dhigo Janaayo 2022, ayaa sare u kacay 0.41 boqolkiiba. Sare u kaca billaha ee ugu badan ayaa ka yimid qiimaha **Tubaakadda (+28.71 boqolkiiba)**. qiima kororka ugu badan ayaa yimid **Tubaakadda**. Sare u kaca ugu badana ayaa ahaa **Qaadka (Miiraha ah) oo gaaray (+50.00 boqolkiiba)**. (Jaantuska2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Febraayo 2023 iyo Febraayo 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.43 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.57 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay **Janaayo 2022** iyo **Janaayo 2023**.

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Febraayo 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Febraayo 2023	
Tusaha bishan (Febraayo 2023)	134.54
Tusaha bishii hore (Janaayo 2022)	133.99
Tusaha sanadkii hore (Febraayo 2022)	127.61
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.41%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.43%

### Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda eee 12billod

### Tixraca TSBd-a

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Febraayo 2023

### Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Febraayo 2023

Heerka sicir-bararka bisha Febraayo 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Febraayo 2022 iyo Febraayo 2023.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa hoos u dhacay 5.43 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Febraayo 2022 iyo Febraayo 2023, marka labar bardhigo 5.57 boqolkiiba 12kii bilood, Janaayo 2022 iyo Janaayo 2023.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ee Febraayo 2023 ayaa sameeyey sare u kac dhan 0.41 boqolkiiba.

### Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Febraayo 2023.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 0.00 boqolkiiba, bishii Febraayo 2023 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -1.42 boqolkiiba bishii Janaayo 2022. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 5.41 boqolkiiba bishii Febraayo 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 6.72 boqolkiiba Janaayo 2022.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah -0.02 bishii Febraayo 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey hoos u dhac dhan 5.49 boqolkiiba bishii Febraayo 2022. Marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah 5.51 boqolkiiba ee Janaayo 2022.

### Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha laxushay

Index = 100 @ December 2014




Ishaxogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Febraayo 2023 (Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 84.76 boqolkiiba bishii Febraayo 2023. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+118.8 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 8.97 boqolkiiba bishii Febraayo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+14.67 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 7.29 boqolkiiba, 12 bilood ee la soo dhaafay bishii Febraayo 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha adeega bukaan socodka (+9.92 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 5.49 boqolkiiba bishii Febraayo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada, gaaska & baasiinka +14.87 boqolkiiba.
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sare u kacay 5.41 boqolkiiba, 12 bilood ee la soo dhaafay Febraayo 2022 iyo Febraayo 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha cuntada (+5.58 boqolkiiba). Qiima kororka waxaa ka qeyb qaatay Burka Qamadiga/sareenta oo gaaray (50.00 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 2.81 boqolkiiba Febraayo 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+7.84 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa sare u kacay 2.67 boqolkiiba Febraayo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha kala daabulista agabka shaqsi ahaaneed +8.71 boqolkiiba.

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia


**Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 2.17 boqolkiiba Febraayo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Maqal-arag, Sawirqaadista iyo habayn xogta oo gaaray +2.74 boqolkiiba.

**Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Febraayo 2023 (-)**

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Febraayo.

**B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da**

**Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Febraayo 2023 (Dec 2014 = 100)**



**Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Febraayo 2023 (+)**

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kaac bille ah oo gaaraya 28.71 boqolkiiba bishii Febraayo 2023. sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada (+50.00 boqolkiiba).

**Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Febraayo 2023 (-)**

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Febraayo

**Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha  
2023 ee habka (COICOP)**

**badeecadaha**

**Febraayo**

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Febraayo 2022 TSB	Janaayo 2023 TSB	Febraayo 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
<b>Dhamaan Qeybaha Tsb</b>	100.00	127.61	133.99	134.54	0.41	5.43
Cuntada & Cabitaanada	46.04	135.01	142.32	142.32	0.00	5.41
Tubaakadda	1.25	86.47	124.13	159.76	28.71	84.76
Dharka & Kabaha	5.03	147.53	149.71	151.47	1.17	2.67
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	117.95	124.46	124.43	-0.02	5.49
Agabka Guryaha	2.93	109.53	109.38	109.38	0.00	-0.13
Caafimaadka	5.00	161.16	172.91	172.91	0.00	7.29
Gaadiidka	3.77	109.17	109.71	109.16	-0.50	-0.01
Isgaarsiinta	2.80	103.03	103.03	103.03	0.00	0.00
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	101.64	103.85	103.85	0.00	2.17
Taciiinta	4.00	109.11	109.11	109.11	0.00	0.00
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	133.78	145.78	145.78	0.00	8.97
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	108.95	110.56	112.01	1.31	2.81

**Ogeysiis:**

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

**Soosaarida tan xigta**


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Maajo, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Abriil, 2023. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

**Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Febraayo 2023 marka loo eego COICOPka**

**Dhamaan qeybaha TSB-da**

Qeybaha ka qeybqaara (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia